

www.awyuusuf.com

AF SOOMAALIGA QURAANKA KU JIRA

Maxaad ka ogtahay erayada afkeena

Hooyo ee Quraanka ku jira?

Waxaa Qoray

Sayid Cabdiraxmaan Sheekh

Xasan Aw Yuusuf

Taqwad

Tacliin www.awyuusuf.com Toosin

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

HORDHAC

Run ahaantii qorida Buuggani wakhti dheer baan ku fikirayey. Markaan yaraa waxaan aad u jeclaa inaan Culimada ka dhagaysto Tafsiirka Quraanka, iyo casharada Diiniga ah guud ahaan.

Waxaan si gaar ah aad u xiisayn jiray Qisooyinka Nabiyada قصص الأنبياء Markasta oo aan qiso maqlana waxaan jeclaa inaan waxbadan kasii ogaado. Taasina waxay igu dhalisay inaan Quraanka aad u akhriyo. Nasiib wanaag markii ugu horraysay ee aan arko Kitaabka Quraanka ah oo Turjubaan Af Soomaali ahi la socdo waxay ii ahayd farxad weyn. Kadibna waxaan bilaabay inaan Quraanka u barto si fiican anigoo baadhaya Suurad, iyo Aayad walba fasirkooda guud, iyo erayo ahaanba. Ugu dambayna waxaan ogaaday iney Quraanka Kariimka ah ka buuxaan erayo badan oo Af Soomaali ah. Quraanku 100% waa Carabi asli ah. Hadaba maxaa keenay iney Quraanka ku jiraan erayo aanay hadda isticmaalin dadka Af Carbeedka ku hadlaa?.

Erayada inta badan lagu sheego iney yihiin erayo shisheeye (*Foreign words*) ee Quraanka ku jira runti waxaan cilmi baadhistayda ku ogaaday ineyna erayo shisheeye ahayn ee ay yihiin erayo kasoo jeeda Carabigii qadiimiga ahaa, kaaso hadda aanay Carabtu u isticmaalin nolol maalmeed-kooda (*Their daily lives*)

Tusaale: Erayga; قَسْوَرَةٍ (*Libaax*) Qaswara, Suurada Mudasir سُورَةُ المُدَّثِّر (*74:51*) waa eray Axmaari ah (*Ethiopian*) balse luuqada Axmaarigu waa mid ka mid ah luuqadaha ay dadka Shaamka ahi (*Semitic people*) ku hadlaan, markaa erayga; قَسْوَرَةٍ (*Libaax*) Qaswara, waa Carabi asli ah. Laakiin markay kalabaxeen luuqadahaasi ayey Axmaaradu si gooni ah u qaateen eraygaas. Sidaa darteed Axmaariga, Cimraaniga (*Hebrew*), iyo Carabigu waa luuqado walaalo ah hal meelna kasoo wada jeeda, erayo badana wadaaga. Waxaad kaloo aad ogaan doontaa in luuqadaha Soomaaliga, iyo Carabiga ay jirtay maray isku mid ahaayeen, amaba ugu yaraan aad iskugu dhawaayeen.   -Wabillaahi Tawfiiq-

Quraanka, iyo Af Soomaaliga

Runtii qofka aad u akhriya, una barta Quraanka Kariimka ah, Af Soomaaligana aqoon fiican u leh, dhib kuma aha inuu markiiba Isha la helo, fahmana Af Soomaaliga Quraanka ku jira.

Siduu Af Soomaaligu Quraanka ugu jiri karaa?

Cilmi baadhis aan wakhti dheer waday waxaan ku ogaaday in qiyaastii Shan Kunoo Sano (5000) wakhti hadda laga joogo ay luuqadaha Soomaliga, iyo Carabigu hal luuqad wada ahaayeen, amaba ugu yaraan ay aad iskugu dhawaayeen. Waxaana ay u badan tahay iney Soomalidii, iyo Carabtii hore is-fahmi jireen si dhibyarna u wada hadli jireen iyadoon loo kala Turjubaanin sida hadda jirta oo kale. Balse in loo kala turjumo wakhtigan hada ahna waxaa keenay kala bixida ay labada luuqadood kala baxeen aadna u kala fogaadeen, iyadoo ay luuqad walba goonideeda u abuurantay (*developed independently*) islamarkaana ay luuqado kale saamayn ku yeesheen.

(Quraanku) Waa Af Carabi Cad (Suurada Ash-Shucaraa (26:195)

Siduu Allaah (*swt)* Quraanka inoogu sheegay; Wuxuu Eebe Quraanka kusoo dajiyey luuqada Carabiga oo cad. Balse luuqada Soomaaligu hada Carabiga wey ka duwan tahay. Hadaba maxaa keenay in erayo badan oo Af Soomaali ahi ay Quraanka ku jiraan? Su'aashaa jawaabteedu waxay ku jirtaa oo laga dhex heli karaa Af Soomaaliga naftiisa! Erayada Af Soomaaliga ah ee Quraanka ku jiraa waxay iskugu jiraan laba qaybood.

1. Erayo Af Soomaali ah oo soo dajintii Quraanka ka hor ay Soomaalidu isticmaali jirtay

   Tusaale ahaan; waxaa caddayn u ah erayga Waaq oo Af Soomaali qadiimi ah, islamarkaana Carabi qadiimi asli ah. Sidoo kale erayada Jarar, Jawhar, iyo kuwo kaloo badani waa Af Soomaali qadiimiya inbadan oo dhulalka Soomaalidu degtana waa loogu magac daray.

2. Erayo lasocday markay Diinta Islaamku soo gaadhay Dhulka Soomaalida, noqdayna qayb kamid ah Af Soomaaliga.

Tusaale ahaan; Salaada, Soonka, Xajka, Sakada iwm. Halkaasna waxaa ku cad inuu Af Soomaaligu asal ahaan kasoo jeedo luuqada Carabiga.

Inkasta oo buugaagta lagu qoro iney Soomaalidu kasoo jeedo Kuush (*Cushite*) Binu Haam, balse Soomaalidu runtii waxay kasoo jeedaa Kuush walaalkii, lana odhan jirey Punt (*Bunta*) Binu Xaam Binu Nuux. Punt, iyo Kuush waxay wada daganaayeen Koonfurta Carabiya iyo labada dhinaca ee Badda Cas (*Jasiiratul Carab, iyo Afrikada Bari*). Sidoo kale waxay Punt, iyo Kuush walaalo ahaayeen Masri Binu Xaam (*Masaaridii hore oo aanay Faraaciintu ku jiri*) , iyo Hindi Binu Haam (*Hindida Maariinka-Madow ah ee hadda degta Koonfurta India*). Dhinac walbana waxay ahaayeen qabiilo isku dhow, sida dhaqanka, iyo luuqada.

Faraaciintu waxay kasoo jeedaan qabiilkaas Punt la odhan jirey (*Soomaalidii hore, Masarna waxay ku qabsadeen dagaal*) asalkoodiina waxay ka yimaadeen Geeska Afrika, amaba Dhulkii Udugga (*Puntland*). Ingiriisku runtii nebcaansho gaamuray ayuu u qabaa dadka Soomaaliyeed, taariikh been ahna wuu u sameeyey si uu u qariyo taariikhda lix kunoo Sanadood (6000) ah ee ay Ummada Soomaaliyeed leedahay. Soomaliduna waa kuwa kaliya ee xorta ah, Kuushkii kale, sida Oromada, Canfarta, iyo kuwo kale oo ay Soomaalida iskugu dhawaayen xagga Jinsiyadda wuxuu Ingiriisku ku kala daray Ethiopia, Kenya, iyo Eritrea.

Qaabka aan u qoray Buugga

Farta Af Soomaaligu waxay ka kooban tahay 26 Xaraf oo lagu qoray xarfaha Farta Laatinka (*based on Latin alphabet)*

Qaabka xarfaha luuqada Soomaaliga layskugu xejiyey, amaba layskugu xiriiriyey waa isla qaabka ay xarfaha Carabigu u xiriirsan yihiin iskuguna xigaan. Xarfaha Carabigu waxay ka bilawdaan أ (*Alif*) sidaa darteed baan buugga ku bilaabay xarafka “A”.

Sharaxaad ku saabsan Xarafka “DH” iyo Xarfo kale

Inkasta oo uu Af Soomaaliga aad ugu jiro xarafka “DH” haddana erayada Carabiga ah ee ka bilawda xarfaha ظ iyo ط waxay Soomaalidu u istcmaashaa xarafka “D” .

Tussale: Erayga لَحْمًا طَرِيًّا (*Hilib Daray ah*) (*Suurada An-Naxli (16:14*)

Sidaad kor ku aragtid لَحْمًا طَرِيًّا Af Soomaali ahaan uguma dhawaaqno "Dh" sidoo kalena uma qorno -Hilib Dharay- ah ee waxaan u qornaa "Hilib Daray" ah, dhawaaqiisuna waa xarafka "D".

Waxaa kale oo aan Quraanka ka dhex helay erayo aad u badan oo ay iskusi ugu dhwaaqaan Carabta, iyo Soomaalidu balse macanahoodu kala duwan yahay. Tusaale: Erayga ٱلنَّاسِ "Naas". Soomaalidu waxay Naas u taqaana; Xubinta Nuujinta ilmaha ee Hooyada, halka ٱلنَّاسِ uu Carabiga yahay "Dad". Erayada noocan oo kale ahna buugga maanan kusoo darin ee waan ka tagay waayo macnuhu isma waafaqsana (*isku mid maahin*).

Luuqada Soomaaligu malaha xarfaha Carabiga ee kala ah:

غ	ظ	ض	ص	ز	ذ	ث

Sidaa darteed erayada Carabiga ah ee ka bilaabanayey xarfahan kore, waxaan ku badalay xarfo Soomaali ah oo dhawaaqooda ay Soomalidu garanayso. Fiiri sidey Soomaalidu ugu dhawaaqdo erayga Adhi & Ari, ama muxuu yidhi & muxuu yiri! Xidhiidh & Xiriir.

Sidoo kale xarafka ط, inta badan waxaan ku badalay xafarka "D" ee Soomaaliga ah.

Fiiri shaxda hoos



Tusaale ku saabsan erayga "Tukubid"

قَالَ هِيَ عَصَايَ أَتَوَكَّؤُا۟ عَلَيْهَا وَأَهُشُّ بِهَا عَلَىٰ غَنَمِى وَلِىَ فِيهَا مَـَٔارِبُ أُخْرَىٰ ﴿١٨﴾

Tukubid, Suurada Taaha (20:18)

Fasiraada Aayada

Wuxuu yidhi (*Nabi Muuse*) iyada waa Ushaydii waan ku Tukubaa (*cuskadaa*) korkeeda waxna waan ugu lulaa (*Laamah geedaha baan ugu soo laalaadiyaa*) Adhigayga dana kalena waan ku qabsadaa.

Qeexid: Tukubid waa waxaad cuskatid markaad socotid, amaba qofku kaalmaysto markuu istaagayo. Eraygu waa Af Soomaali, waana Carabi asli ah. Ku dhawaaqida baase waxyar kala duwan. Xididka erayguna waa Carabi, iyo Soomaali (*Root Word*).

<u>Fiiri shaxda hoos</u>

Shaxdan kore waxay muujinaysaa siduu erayga أَتَوَكَّؤُاْ u yahay "Tukubid" waana Af Soomaali run ah. Waayo sidaan cilmi baadhis ku ogaaday waxaa jirtay wakhti ay Af Soomaliga & Af Carabigu isku hal luuqad ahaayeen, amaba aad iskugu dhawaayeen.

Fiiro gaar ah oo ku saabsan erayga "Nuur"

Nuur waa iftiinka aynu wax ku aragno. Nuur la'aantii Indhuhu waxba ma markaan. Balse nuurka dhabta ahi waa hanuunka, iyo Kitaabka Quraanka. Sidaa darteed baan Kitaabka Quraanka ah uga soo ururiyey Aayayaha uu Allaah (*swt*) uga hadlayo Nuurka. Aayada <u>1aad</u> ee aan soo qaatay waxay ku jirtaa isla Suurada wadata magaca nuur; Waana Suurada An-Nuur سورة النور Aayadu waxay ku bilaabatay inuu Eebe (*swt*) yahay Nuuriyaha Samaawaadka iyo Dhulka.

Maanta Adduunka waxaa qabsaday Mugdi, Jaahilnimo, iyo Daaquud (*Shaydaan*), waxaa kaloo jirta iney shaydaamintii Mugdiga ku jirey ay si been ah u sheegtaan ineyba yihiin Nuur, iyagoo labaxay magaca "Illuminati" (*Nuuriyaal*) halkay xaqiiqdu tahay iney yihiin Mugdi iyo Jaahilnimo ku nool shaydaamo ah. Sidaa darteed baan rabaa inaad ila barataan oo fahamtaan in Nuurka kaliya ee <u>Xaqqa</u> ahi (*Runta ahi*) uu yahay Nuurka Allaha weyn (*swt*). Buuggani kuma saabsana oo kaliya xiriirka dheer ee luuqadaha Carabiga & Soomaaliga ee waa Dacwo Diini ah.

-Sayid Cabdiraxmaan Sheekh Xasan Aw Yuusuf-

e-mail: abdirahman@awyuusuf.com Site: www.awyuusuf.com

Hagista Akhrinta Ee Buugga

Waxay ka hoosaysaa Fasiraadda Aayada.

Waxay ka hoosaysaa Faalada, iyo sharaxaada erayga, amaba Aayada.

Waa akhri waxa ku xiga, amaba wax ku qoro. (*Take a note*).

Waa fiiri halkan

Wax Ku Qoro

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

TUSMADA BUUGGA

Erayada Xarafka -A-------------------11
Erayada Xarafka -B-------------------26
Erayada Xarafka -T-------------------40
Erayada Xarafka -J--------------------46
Erayada Xarafka -X-------------------53
Erayada Xarafka -KH-----------------68
Erayada Xarafka -D-------------------77
Erayada Xarafka -R-------------------96
Erayada Xarafka -S-----------------103
Erayada Xarafka -SH---------------114
Erayada Xarafka -DH---------------122
Erayada Xarafka -C-----------------125
Erayada Xarafka -G-----------------143

Magaca, & Macnaha 114ka Suuradaha Quuranka oo Af Soomaali ah. ----248

Erayada Xarafka -F-----------------146
Erayada Xarafka -Q-----------------162
Erayada Xarafka -K-----------------172
Erayada Xarafka -L-----------------182
Erayada Xarafka -M----------------186
Erayada Xarafka -N----------------198
Erayada Xarafka -W----------------213
Erayada Xarafka -H-----------------225
Erayada Xarafka -Y-----------------230
Erayada Xarafka -E-----------------235
Erayada Xarafka -I------------------236
Erayada Xarafka -O-----------------242
Erayada Xarafka -U-----------------245

AW YUUSUF.com
Taqwad Tacliin Toosin

Wax Ku Qoro

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Erayada Ka Bilawda Xarafka "A"

وَإِذْ قَالَ إِبْرَٰهِيمُ رَبِّ ٱجْعَلْ هَٰذَا ٱلْبَلَدَ ءَامِنًا وَٱجْنُبْنِى وَبَنِىَّ أَن نَّعْبُدَ ٱلْأَصْنَامَ ٣٥

Aamin, Suurada Ibraahim (14:35)

Fasiraadda Aayada

Xusuusta markuu (*Nabi*) Ibraahim yidhi Rabiyoow ka yeel Baladkan (*Maka*) Aamin igana dheeree (*Aniga*) iyo Caruurtayda inaan caabudno Sanamyada.

Tusaalaha erayga Aamin, iyo isticmaalkiisa

Aamin waa meel ay nabadgalo iyo xasinooli taalo.

Siduu Eebe (*swt*) Quraanka inoogu sheegay ducadii Nabi Ibraahim waa la aqbalay.

Fiiri; Suurada At-Tiin (95) iyo Suurada Quraysh (106).

Erayga "Aamin" asalkiisu waa Carabi, Soomaali ahaana macnihiisu waa "Nabadgalyo". Sidaad arki doontaan waxaa jira erayo badan oo asal ahaan Carabi ah, sidoo kalena ay Soomaalidu aad u isticmaasho. Waxaad kale oo aad arki doontaan in Af Soomaalig & Carabigu ay hal Xidid kasoo wada farcameen.

Tusaale: Magaaladani waa magaalo aad *aamin* u ah dadkuna wax dhib ah kuma qabaan.

Fiiro gaar ah

Fiiri erayga "Waaq" Iyo sharaxaad dheeraad ah oo ku saabsan xiriirka ka dhaxeeya Af Soomaaliga, iyo Carabiga.

أَفَمَنْ أَسَّسَ بُنْيَٰنَهُۥ عَلَىٰ تَقْوَىٰ مِنَ ٱللَّهِ وَرِضْوَٰنٍ خَيْرٌ أَم مَّنْ أَسَّسَ بُنْيَٰنَهُۥ عَلَىٰ
شَفَا جُرُفٍ هَارٍ فَٱنْهَارَ بِهِۦ فِى نَارِ جَهَنَّمَ ۗ وَٱللَّهُ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٠٩﴾

Aasaas, Suurada At-Tawba (9:109)

Fasiraadda Aayada

Ma ruux ku aasaasay dhismihiisa ka dhawrsasho Eebe iyo ka raalli noqoshadiisa yaa ka khayr roon mise ruux ku aasaasay dhismihiisa dhinaca qar dumaya oo kula dhici naarta Jahannamo, Eebana ma hanuuniyo Qoom daalimiin ah.

Tusaalaha erayga Aasaas, iyo isticmaalkiisa

Erayga Aasaas macnahiisu waxa weeye Dhagax dhig, amaba waxa ugu horeeya ee dhismo laga bilaabo. Sida dhisida guryaha oo kale.

Tusaale: Gurigaas markii la dhisayey aasaas fiican baa loo sameeyey, sidaa darted inuu dumo cabsi loogama qabo.

وَلَن يَتَمَنَّوْهُ أَبَدًۢا بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ ۗ وَٱللَّهُ عَلِيمٌۢ بِٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٩٥﴾

Abid, Suurada Al Baqara (2:95)

Fasiraadda Aayada

Mana jeelaanayaan (*geerida*) abidkood, waxay gacmahooda ku hormarsadeen darteed, Eebana waa ogyahay daalimiinta.

Tusaalaha erayga Abid, iyo isticmaalkiisa

Abid, waa eray caan ah aadna ugu jira Suugaanta Soomaalida sida; Gabayada, Guuroowga, iwm macna ahaanaana wuxuu noqonayaa amaba loo isticmaalaa wax la diidan yahay.

Tusaale: Cali waliigaba abid diyaarad muusan raacin.

Dhinaca Aayada hadaan ka hadalno; Allaah (*swt*) wuxuu inoo sheegayaa iney Yuhuudu geerida, iyo aakhiro aad u neceb yihiin waayo dambiyada ay gacmahooda ku geysteen darted sida Kalaamka (*Kutubta*) Eebe oo ay been abuur ka sameeyeen, qoraalkiina badaleen, dilka Anbiyada ay dileen, iyo Ribada.

قَالُوا۟ يَٰمُوسَىٰٓ إِنَّا لَن نَّدْخُلَهَآ أَبَدًا مَّا دَامُوا۟ فِيهَا ۖ فَٱذْهَبْ أَنتَ وَرَبُّكَ فَقَٰتِلَآ إِنَّا هَٰهُنَا قَٰعِدُونَ ٢٤

Abid, Al Maaida (5:24)

Fasiraadda Aayada

Waxay dhaheen Muusow anagu ma galayno Abidkano intay joogaan ee taga adiga iyo Rabigaa oo la dagaalama anagu halkan baanu fadhinaynaa.

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِۦٓ إِنَّ ٱللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تَذْبَحُوا۟ بَقَرَةً ۖ قَالُوٓا۟ أَتَتَّخِذُنَا هُزُوًا ۖ قَالَ أَعُوذُ بِٱللَّهِ أَنْ أَكُونَ مِنَ ٱلْجَٰهِلِينَ ٦٧

Acuudu, Suurada Al Baqara (2:67)

Fasiraadda Aayada

Xusa markuu ku yidhi (*Nabi*) Muuse qoomkiisa Eebe wuxuu idin farayaa inaad gawraedaan Sac, waxayna dhaheen miyaad nagu jees jeesaysaa, wuxuuna ku yidhi waxaan ka magangalay (*Acuudu*) Eebe inaan ka mid noqdo kuwa Jaahiliinta ah.

Tusaalaha erayga Acuudu, iyo isticmaalkiisa

Acuudu Waxaa loo isticmaalaa markaad la kulantid wax kaa yaabiya, amaba wax shar ah macnahiisuna waxaa weeye inaad Allaah (*swt*) ka magan-gashid waxaas.

Tusaale: Acuudu Billaahi Mina shaydaani rajiim (*Eebaan ka magan-galay shaydaanka la takooray*).

قُلْ أَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَٱلرَّسُولَ ۖ فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَإِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٣٢﴾

Adeec, Suurada Aali Cimraan (3:32)

Fasiraadda Aayada

Waxaad dhahdaa adeeca Eebe iyo Rasuulkiisa, haddaad jeedsataana Eebe ma jeela gaalada.

Tusaalaha erayga Adeeca, iyo isticmaalkiisa

Adeec macnihiisu waa u hogaansamid, waana eray isticmaalkiisu ku badan yahay Diinta Islaamka.

Tusaale: Eebe, iyo Rasuulka adeecaa weydun liibaaniye.

Fiiri Aayada xigta.

وَأَطِيعُوا۟ ٱللَّهَ وَٱلرَّسُولَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿١٣٢﴾

Adeec Suurada Aali-Cimraan (3:132)

Fasiraadda Aayada

Adeecana Eebe iyo Rasuulka waxaad u dhaw dihiin in laydiin Naxariistee.

Fiiro gaar ah

Waxaan marlabaad u soo celiyey erayga “Adeec” inaan walaalaha Soomaaliyeed xusuusiyo muhiimada ay leedahay ineynu si buuxda u adeecno Ilaahii (*swt*) ina abuuray, Rasuulkeena Muxamadna (ﷺ) adeecno sidaasayna ku jirtaa liibaanteena aduun iyo aakhiro. Waana amar uu Allaah (*swt*) ina faray.

زُيِّنَ لِلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَا وَيَسْخَرُونَ مِنَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ۘ وَٱلَّذِينَ ٱتَّقَوْا۟ فَوْقَهُمْ يَوْمَ
ٱلْقِيَـٰمَةِ ۗ وَٱللَّهُ يَرْزُقُ مَن يَشَآءُ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿٢١٢﴾

Aduunyo, Suurada Al Baqara (2:212)

Fasiraadda Aayada

Waxaa loo qurxiyey kuwa gaaloobay nolosha dhaw ee aduunyada, waxayna ku jees jeesaan kuwa rumeeyey Xaqqa, kuwa dhawrsadaana (*Muslimiinta*) iyagaa ka sarrayn (*gaalada*) maalinta Qiyaame, Eebana wuu Arsuqaa cidduu doono Xisaab la'aan.

Fiiro gaar ah

Erayga Aduunyo macneedu waa noloshan dhow ee aynu hada ku nool nahay, Aakhirana waa nolosha dambe ee uu Allaah (swt) inala jecel yahay. Bal fiiriya sida ay gaalada aakhiro beeniyey u yasayaan kuwa Ilaahay ka baqaya (*Muslimiinta*) laakiin Eebe wuxuu kuwa rumeeyey ee isaga kaliya ka cabsada u ballan qaaday iney gaalada ka sareyn doonaa maalinta aakhiro. Eebana wacdigiisa, iyo wuxuu ballan qaado waa run iyo xaqqiiq.

قَالَ قَدْ أُجِيبَت دَّعْوَتُكُمَا فَٱسْتَقِيمَا وَلَا تَتَّبِعَآنِّ سَبِيلَ ٱلَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٨٩﴾

Ajiib, Suurada Yuunis (10:89)

Fasiraadda Aayada

Eebe wuxuu yidhi waa la ajiibay (*aqbalay*) baryadiina ee toosnaada hana raacina Jidka kuwa aan waxba ogayn.

Tusaalaha erayga Ajiib, iyo isticmaalkiisa

Ajiib waa aqbalaad, macnuhuna waxaa weeye waa lagaa yeelay barya-daadi.

"Allaah (*swt*) ducada uu adoonkiisu kuducaysto wuu ajiibaa"

Tusaale: Wadaadkaasi waa daacad, ducadiisana malaha waa la ajiibaa!

وَإِنَّهُمْ عِندَنَا لَمِنَ ٱلْمُصْطَفَيْنَ ٱلْأَخْيَارِ ﴿٤٧﴾

Akhyaar, Suurada Saad (38:48)

Fasiraadda Aayada

Waxayna ka yihiin agtanada kuwo la doortay oo akhyaar ah.

Tusaalaha erayga Akhyaar, iyo isticmaalkiisa

Akhyaar waa eray caan ah, oo loogu yeedho dadka wanaagsan ee la jecel yahay.

Tusaale: Axmed waa akhyaar Sharaf leh oo aad u Sadaqo badan.

وَكَتَبْنَا لَهُۥ فِى ٱلْأَلْوَاحِ مِن كُلِّ شَىْءٍ مَّوْعِظَةً وَتَفْصِيلًا لِّكُلِّ شَىْءٍ فَخُذْهَا بِقُوَّةٍ
وَأْمُرْ قَوْمَكَ يَأْخُذُوا۟ بِأَحْسَنِهَا ۚ سَأُو۟رِيكُمْ دَارَ ٱلْفَـٰسِقِينَ ١٤٥

Alwaax, Al Acraaf (7:145)

Fasiraadda Aayada

Waxaan ugu qornay <u>alwaaxda</u> wax kastoo wacdi iyo Caddayna, ee ku qaado niyadadag farna Qoomkaaga inay qaataan, ha qaataan teeda wanaagsan waxaanan idin tusin doonaa guryihii Faasiqiinta.

Erayga Alwaax (*Alwaaxda*} jamac; waa dhirta amaba geedaha qalalay ee loo isticmaalo dhismaha, iyo in wax lagu qoro sida looxda ay Soomaalidu Quraanka ku dhigato. Aayaduna waxay ka hadlaysaa Kitaabkii Tawreed ee Eebe (*swt*) kusoo dajiyey Nabi Muuse iyo walaalkii Nabi Haaruun (*cs*).

بَدِيعُ ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ وَإِذَا قَضَىٰٓ أَمْرًا فَإِنَّمَا يَقُولُ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ١١٧

Amar, Suurada Al Baqara (2:117)

Fasiraadda Aayada

Isagaa abuuray Samooyinka iyo Dhulka, markuu doono inuu <u>amar</u> gooyana wuxuu uun dhahaa ahaw wuuna ahaadaa.

Tusaalaha erayga Amar, iyo isticmaalkiisa

Amar waa arrin la amray, amaba la wargaliyey. Eebanaa (*swt*) wuxuu doonayo waa uun ahaw, kadibna wuu ahaadaa.

Tusaale: Amar fiican baa la siiyey kooxdaas.

وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ مِنكُمْ وَعَمِلُواْ ٱلصَّٰلِحَٰتِ لَيَسْتَخْلِفَنَّهُمْ فِي ٱلْأَرْضِ كَمَا ٱسْتَخْلَفَ
ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ وَلَيُمَكِّنَنَّ لَهُمْ دِينَهُمُ ٱلَّذِي ٱرْتَضَىٰ لَهُمْ وَلَيُبَدِّلَنَّهُم مِّنۢ بَعْدِ خَوْفِهِمْ أَمْنًا
يَعْبُدُونَنِي لَا يُشْرِكُونَ بِي شَيْـًٔا وَمَن كَفَرَ بَعْدَ ذَٰلِكَ فَأُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْفَٰسِقُونَ ٥٥

Amni, Suurada An-Nuur (24:55)

Fasiraadda Aayada

Wuxuu u ballan qaaday Eebe kuwa rumeeyay (*Xaqqa*) oo camal fiican falay inuu u reebo (*dhaxalsiiyo*) dhulka siduu kuwii ka horeeyeyba u dhaxalsiiyey, wuxuuna makansiin (*ku guulayn*) diintooda uu uga raalli noqday wuxuuna ugu badali cabsidooda ka dib nabadgalyo, wayna I cabudi ilamana wadaajiyaan waxba, Ciddii gaalowda intaas ka dibna kuwaasu waa uun faasiqiin.

Tusaalaha erayga Amni, iyo isticmaalkiisa

Amni waa nabadgalyo iyo xasinooli. Eebena wuxuu Muslimiinta u ballan qaadayaa in hadaynu Xaqqa rumayno, isaga kali ahna caabudno inuu inaga dhigayo kuwa u hadhaya Dhulka, amni iyo xasinoolina inna siinayo.

Tusaale: Dhulkaasi waa dhul amni ah.

قُلْ أَتَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَمْلِكُ لَكُمْ ضَرًّا وَلَا نَفْعًا وَٱللَّهُ هُوَ ٱلسَّمِيعُ
ٱلْعَلِيمُ ٧٦

Anfac, Al Maaida (5:76)

Fasiraadda Aayada

Waxaad dhahdaa ma waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow waxaan dhib iyo <u>anfac</u> (*midna*) idiin lahayn, Eebana yahay wax walba maqle wax walbana oge.

قَالَ ٱللَّهُ هَٰذَا يَوْمُ يَنفَعُ ٱلصَّٰدِقِينَ صِدْقُهُمْ ۚ لَهُمْ جَنَّٰتٌ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَآ أَبَدًا ۚ
رَّضِىَ ٱللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا۟ عَنْهُ ۚ ذَٰلِكَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ١١٩

Anfac, Suurada Al Maaida (5:119)

Fasiraadda Aayada

Wuxuu yidhi Eebe tani (*maanta*) waa maalinta ay <u>Anfaci</u> kuwa runta sheega runtoodu, waxaana u sugnaaday Jannooyin ay hoostooda qulqulayaan wabiyo ayagoo ku waaraya waligood waxaana ka raalli noqday Eebe Iyana way ka raalli noqdeen isaga (*Eebe*), taasina waa liibaanta wayn.

Tusaalaha erayga Anfac, iyo isticmaalkiisa

Anfac, waxaa kaloo loo dhigi karaa faaiido, amaba waxtar.

Tusaale: Baabuurkani waa baabuur waxtar, amaba anfac leh.

قُلْ إِنِّىٓ أَخَافُ إِنْ عَصَيْتُ رَبِّى عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ١٥

Anigu, Suurada Al Ancaam (6:15)

Fasiraadda Aayada

Waxaad dhahdaa <u>anigu</u> waxaan ka cabsan haddaan <u>Caasiyo</u> Eebehay Cadaab Maalin wayn.

وَإِذَا رَأَوْكَ إِن يَتَّخِذُونَكَ إِلَّا هُزُوًا أَهَٰذَا ٱلَّذِي بَعَثَ ٱللَّهُ رَسُولًا ﴿٤١﴾

Arag, Suurada Al Furqaan (25:41)

Fasiraadda Aayada

Markay ku arkaan gaaladu (*Nabi Muxamad*) waxay kaa dhigtaan Jees Jees, iyagoo (*dhihi*) ma kanaa kuu Eebe soo bixiyey (*soo diray*) isagoo Rasuul ah.

Erayga Arag, waxaa kaloo loo qori karaa "Arak" xusuusta luuqada Carabigu malaha xarafka "G". Sidaa darteed xarafka "G" iyo "K" waa laysku badali karaa. (*Interchangeable Letters*)

Tusaale: Waan ku aragnaa, amaba waan ku arkaynaa.

قَدْ سَمِعَ ٱللَّهُ قَوْلَ ٱلَّتِي تُجَٰدِلُكَ فِي زَوْجِهَا وَتَشْتَكِيٓ إِلَى ٱللَّهِ وَٱللَّهُ يَسْمَعُ تَحَاوُرَكُمَآ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعُۢ
بَصِيرٌ ﴿١﴾

Ashkato, Suurada Al-Mujadilah (58:1)

Fasiraadda Aayada

Eebe wuu maqlay Haweenaydii hadalkeeda Nabiga kula doodaysay xaalka ninkeeda, oo Eebe u askashootay (*u dacwootay*) Eebana wuu maqlayey doodooda, maxaa yeelay Ilaahay waa ka wax walba maqle arkana.

Tusaalaha erayga Ashkato, iyo isticmaalkiisa

Ashkato waa dacwayn.

Tusaale: Hebel wixii lagu eedeeyey ayuu ka ashkato keenay, amaba dacwo ayuu ka keenay.

وَقَالَ رَجُلٌ مُّؤْمِنٌ مِّنْ ءَالِ فِرْعَوْنَ يَكْتُمُ إِيمَـٰنَهُۥٓ أَتَقْتُلُونَ رَجُلًا أَن يَقُولَ رَبِّىَ ٱللَّهُ
وَقَدْ جَآءَكُم بِٱلْبَيِّنَـٰتِ مِن رَّبِّكُمْ ۖ وَإِن يَكُ كَـٰذِبًا فَعَلَيْهِ كَذِبُهُۥ ۖ وَإِن يَكُ صَادِقًا
يُصِبْكُم بَعْضُ ٱلَّذِى يَعِدُكُمْ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى مَنْ هُوَ مُسْرِفٌ كَذَّابٌ ﴿٢٨﴾

Asiib, Suurada Al Qaafir (40:28)

Fasiraadda Aayada

Wuxuu yidhi nin Mu'min ah oo ka mid ah qoyska Fircoon oo qarinaayay limaankiisa, ma waxaad u dilaysaan ninkan (*Nabi Muuse*) oo kaliya inuu yidhi Eebahay waa Allaah, isagoo idiin layimid caddaymo xagga Eebihiin katimid hadduu beenaale yahay isagay beentiisu u taalaa, hadduuse runlow yahay waxaa idin asiibi (*idinku dhici*) wuxuu idiin ku yaboohayo qaarkiis, Eebana ma hanuuniyo danbi badane been badan.

Tusaalaha erayga Asiib, iyo isticmaalkiisa

Asiib waxa weeye waxa qof, amaba bulsho ku dhaca shar iyo khayrba.

Tusaale: Tuulladaas Roob mayey ah baa ku da'ay khayr baana lagu asiibay.

أَلَآ إِنَّ أَوْلِيَآءَ ٱللَّهِ لَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ﴿٦٢﴾

Awliyada, Suurada Yuunis (10:62)

Fasiraadda Aayada

Awliyada Ilaahay cabsi iyo murug midna kuma dhacdo

Tusaalaha erayga Awliyada, iyo isticmaalkiisa

Erayga Awliyo waa eray diini ah, macnahiisu waxaa weeye dadka uu Ilaahay (*swt*) ilaaliyo. Eraygan Soomaalidu si khaldan bey u fahmeen, macnaha runta ahna badankooda muusan ka dhaadhicin.

<u>Firii</u> Aayadan xigta ayuu Allaah (*swt*) inoogu qeexayaa cida ay runtii tahay Awliyadu.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَكَانُوا۟ يَتَّقُونَ ٦٣

Fasiraadda Aayada

Awliyadu waa kuwa Xaqqa rumeeyey, Ilaahayna ka cabsada. *Suurada Yuunis (10:63*) .

<u>Fiiro gaar ah</u>

Qof kasta oo labadaas Shuruudood buuxiya waa Awliyo Ilaahay, waana kuwa uu Ilaahay (*swt*) ilaaliyo.

لَّا يَتَّخِذِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ٱلْكَٰفِرِينَ أَوْلِيَآءَ مِن دُونِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۖ وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ فَلَيْسَ مِنَ ٱللَّهِ فِى
شَىْءٍ إِلَّآ أَن تَتَّقُوا۟ مِنْهُمْ تُقَىٰةً ۗ وَيُحَذِّرُكُمُ ٱللَّهُ نَفْسَهُۥ ۗ وَإِلَى ٱللَّهِ ٱلْمَصِيرُ ٢٨

Awliyo, Suurada Aali-Cimraan(3:28)

Fasiraadda Aayada

Yeyna ka yeelan Mu'miniintu gaalada <u>awliyo</u> (*ilaalo*) Mu'miniinta ka Sokow ruuxii fala saas waxba Eebe kama mudna, inaad dhawrsasho xaggooda ka dhawrsataan mooyee, wuxuuna idiinkaga digayaa Eebe naftiisa, xaga Eebaana loo noqon.

Awliyadu waa kuwa Xaqqa rumeeyey, Ilaahayna ka cabsada. *Suurada Yuunis (10:63)*

Ma haboona iney Mu'miniintu gaalada kuwo ilaaliya ka dhigtaan, iyagoo Mu'miniinta kale ka dulboodaya, sidaana gaalada magan ugu noqda.

۞ يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَتَّخِذُوا۟ ٱلْيَهُودَ وَٱلنَّصَٰرَىٰٓ أَوْلِيَآءَ ۘ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَآءُ بَعْضٍ ۚ وَمَن يَتَوَلَّهُم مِّنكُمْ فَإِنَّهُۥ
مِنْهُمْ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ٥١

Awliyo, Suurada Al Maaida (5:51)

Fasiraadda Aayada

Kuwa Xaqqa rumeeyow ha ka dhiganina Yuhuud iyo Nasaaro awliyo (*kuwo idin ilaaliya*) qaarkood waa u awliyo qaarkooda kale Ciddii awliyo ka yeelata iyaga oo idinka mid ahina waxay ka mid yihiin Iyaga, Eebe ma hanuuniyo Qoomka daalimiinta ah.

Fiiri Aayada xigta sababta uu Allaah (*swt*) u amray mu'miniinta ineysan Yuhuud iyo Nasaaro ka dhigan awliyo.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا تَتَّخِذُوا۟ ٱلَّذِينَ ٱتَّخَذُوا۟ دِينَكُمْ هُزُوًا وَلَعِبًا مِّنَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ مِن قَبْلِكُمْ
وَٱلْكُفَّارَ أَوْلِيَآءَ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ٥٧

Awliyo, Suurada Al Maaida (5:57)

Fasiraadda Aayada

Kuwa Xaqqa rumeyow ha ka dhiganina kuwa ka dhigtay diintiina (*Diinta Islaamka*) Jees Jees iyo ciyaar kuwaasoo ah Ehlu Kitaabka (*Yuhuud iyo Nasaaro*) Idinka horeeyey iyo gaaladaba awliyo, kana cabsada Allaah haddaad tihiin Mu'miniin.

Sharaxaad:

Waxaan u malayn inaad hada si sax ah u fahamtay macnaha culus ee erayga "Awliyo"

Labadan Aayadood ee kor ku xusani waxay taabanayaan dawladaha Muslimiinta maanta talada u hayo, kuwaasoo aad uga hor imanaya amarka Allaah (*swt*).

وَإِذۡ قَالَ عِيسَى ٱبۡنُ مَرۡيَمَ يَٰبَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ إِنِّي رَسُولُ ٱللَّهِ إِلَيۡكُم مُّصَدِّقٗا لِّمَا بَيۡنَ يَدَيَّ مِنَ ٱلتَّوۡرَىٰةِ وَمُبَشِّرَۢا بِرَسُولٖ
يَأۡتِي مِنۢ بَعۡدِي ٱسۡمُهُۥٓ أَحۡمَدُۖ فَلَمَّا جَآءَهُم بِٱلۡبَيِّنَٰتِ قَالُواْ هَٰذَا سِحۡرٞ مُّبِينٞ ٦

Axmed, Suurada As-Saaf (61:6)

Fasiraadda Aayada

Xusuusta marka (*Nabi*) Ciise Ibnu Maryama ku yidhi Banii Israa'iil waxaan ahay Rasuul Eebe idiin soo diray oo rumaynaya Kitaabkii Tawraad ee iga horreeyey, waxaanan idiinku bishaaraynayaa Rasuul gadaashayda imaanaya magaciisuna yahay Axmed, markuu xuja cad ula yimidna waxay dhaheen kani waa sixir cad

---

Axmed waa magac kamid ah magacyada Rasuulkeena Muxamad (*scw*).

Wax Ku Qoro

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Erayada Ka Bilawda Xarafka "B"

ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ٱتَّبَعُوا۟ ٱلْبَٰطِلَ وَأَنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱتَّبَعُوا۟ ٱلْحَقَّ مِن رَّبِّهِمْ ۚ كَذَٰلِكَ يَضْرِبُ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ
أَمْثَٰلَهُمْ ٣

Baadil, Suurada Muxamadl (47:3)

Fasiraadda Aayada

Sidaana waxaa ugu wacan in kuwa gaaloobay ay raaceen baadilka, kuwa rumeeyayna ay raaceen Xaqqa Rabigood uga yimid, saasuuna Allaah ugu soo bandhigaa dadka tusaale

---

Tusaalaha erayga Baadil, iyo isticmaalkiisa

Baadil macnihiisu waa waxaan xaq ahayn.

Tusaale: Waxaasi waa baadil ee iska daa!

مَا عِندَكُمْ يَنفَدُ ۖ وَمَا عِندَ ٱللَّهِ بَاقٍ ۗ وَلَنَجْزِيَنَّ ٱلَّذِينَ صَبَرُوٓا۟ أَجْرَهُم بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا۟
يَعْمَلُونَ ٩٦

Baaqi, An-Naxli 16:96

Fasiraadda Aayada

Waxa agtiinna ah (*waxaad haysataan*) wuu dhamaan waxa Eebe agtiisa ahna wuu baaqi noqon waxaana ka abaal marinaynaa kuwa samra (*adkaysta*) Ajirkooda midka ugu fiican ee ay sameeyeen.

Tusaalaha erayga Baaqi, iyo isticmaalkiisa

Baaqi waa waxa lacagta sarifka ah ee laguu soo celiyo markaad wax gadatid kadib. Hase yeeshee ujeedada Aayadu waxa weeye wax walba oo aduunyada lagu siiyo waa uun wax kaa

dhammaanaya, laakiin waxaad sadaqaysatid ee aad Allaah (*swt*) dartiis u bixisid Eebee agtiisa ayuu kuu yaalaa.

Tusaale: Baaqigii usoo hadhay wuxuu siiyey Miskiin.

ٱلْمَالُ وَٱلْبَنُونَ زِينَةُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ وَٱلْبَٰقِيَٰتُ ٱلصَّٰلِحَٰتُ خَيْرٌ عِندَ رَبِّكَ ثَوَابًا وَخَيْرٌ أَمَلًا ﴿٤٦﴾

Baaqiyaad, Suurada Al Kahaf (18:46)

Fasiraadda Aayada

Maalka iyo wiilashu (*caruurtu*) waa quruxda nolosha adduunyo, kuwa hadha ee wanaagsan ayaa ku khayr roon Eebahaa agtiisa abaalmarina ah kuna khayr roon yididiilo (*camalka fiican*)

Baaqiyaad Al Saalixaad

سُبْحَانَاللّهِ و الْحَمْدُللّهِ وَ لااِلَهَا الّاَاللّهُ وَاللّهُا اكْبَرُ وَ لاحَوْلَوَ لاقُوَّةَ اِلّاَبِاللّهِ

Baaqiyaad waa jamaca erayga baaqi. Waana waxa kaliya ee qofka u raacaya aakhiro. Waana Camalka saalaxa ah iyo xuska Allaah (*swt*) ayaa weeye baaqiyaadka hadhiya.

وَيَزِيدُ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ٱهْتَدَوْا۟ هُدًى ۗ وَٱلْبَٰقِيَٰتُ ٱلصَّٰلِحَٰتُ خَيْرٌ عِندَ رَبِّكَ ثَوَابًا وَخَيْرٌ مَّرَ ﴿٧٦﴾

Baaqiyaad, Suurada Maryama (19:76)

Fasiraadda Aayada

Wuu u siyaadiyaa Allaah kuwa hanuunay hanuun, kuwa hadha ee suuban (*camalka*) yaa khayr roon Eebahaa agtiisa abaal marina u khayr roon meel laysu celiyo.

وَبَرًّا بِوَالِدَيْهِ وَلَمْ يَكُن جَبَّارًا عَصِيًّا ﴿١٤﴾

Baarri, Suurada Maryama (19:14)

Fasiraadda Aayada

Iyo baarri labadiisa waalid mana ahayn isla-weyne caasi ah.

Tusaalaha erayga Baarri, iyo isticmaalkiisa

Baarri waa qofka aan caasiga ahayn, gaar ahaan caruurta aadka u adeecda Waalidkooda.

Tusaale: Caruurtani baarri bey u yihiin Waalidkooda, Maansha Allaah.

فَلَمْ يَكُ يَنفَعُهُمْ إِيمَانُهُمْ لَمَّا رَأَوْا بَأْسَنَا ۖ سُنَّتَ اللَّهِ الَّتِي قَدْ خَلَتْ فِي عِبَادِهِ ۖ وَخَسِرَ هُنَالِكَ الْكَافِرُونَ ﴿٨٥﴾

Baas, Suurada Al Qaafir (40:85)

Fasiraadda Aayada

Mana aha kii anfici iimaankoodu markay arkaan Baaskanaga (*cadaabkanaga*), waana sunnada (*jidka*) Eebe ee u horaysay adoomadiisa, waxaana ku khasaaray halkaas gaalada.

Tusaalaha erayga Baas, iyo isticmaalkiisa

Baas waa shar, masiibo, amaba wax xun.

Tusaale: Baas iyo balaayo Eebe ha inaga nabadgaliyo. Aamiin.

أُحِلَّ لَكُمْ لَيْلَةَ الصِّيَامِ الرَّفَثُ إِلَىٰ نِسَائِكُمْ ۚ هُنَّ لِبَاسٌ لَّكُمْ وَأَنتُمْ لِبَاسٌ لَّهُنَّ ۗ عَلِمَ اللَّهُ
أَنَّكُمْ كُنتُمْ تَخْتَانُونَ أَنفُسَكُمْ فَتَابَ عَلَيْكُمْ وَعَفَا عَنكُمْ ۖ فَالْآنَ بَاشِرُوهُنَّ وَابْتَغُوا
مَا كَتَبَ اللَّهُ لَكُمْ ۚ وَكُلُوا وَاشْرَبُوا حَتَّىٰ يَتَبَيَّنَ لَكُمُ الْخَيْطُ الْأَبْيَضُ مِنَ الْخَيْطِ الْأَسْوَدِ مِنَ
الْفَجْرِ ۖ ثُمَّ أَتِمُّوا الصِّيَامَ إِلَى اللَّيْلِ ۚ وَلَا تُبَاشِرُوهُنَّ وَأَنتُمْ عَاكِفُونَ فِي الْمَسَاجِدِ ۗ تِلْكَ حُدُودُ
اللَّهِ فَلَا تَقْرَبُوهَا ۗ كَذَٰلِكَ يُبَيِّنُ اللَّهُ آيَاتِهِ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَّقُونَ ﴿١٨٧﴾

Baashaal, Suurada Al Baqara (2:187)

Fasiraadda Aayada

Waxaa laydiin banneeyey inaad habeenka Soonka is aragtaan Haweenkiina, maxaayeelay dhar (*asturaad*) bay idiin yihiin, idinkuna dhar (*asturaad*) baad u tihiin, Eebana wuxuu ogaaday inaad khiyaamayseen naftiinna. wuuna idinka toobad aqbalay idina cafiyey ee hada la baashaala (*u taga)* Haweenkiina kana doona waxaa Eebe idiinku qoray, cuna oo cabba intuu ka muuqdo liilanka cadi (*waagu*) kan madow Aroortii, dhammeeyana Soonka tan iyo Habeenka hana la baashaalina (*ha u tagina*) Haweenka idinkoo ku nagi (*ku dhex jira*) Masaajidda taasina waa xuduudda (*Soohdinta*) Eebe ee ha u dhawaanina, saasuuna ugu Caddayn Eebe aayaadkiisa dadka si ay u dhawrsadaan,

Tusaalaha erayga Baashaal, iyo isticmaalkiisa

Baashaal waa eray aad looga isticmaalo Koonfurta Soomaaliya gaar ahaan dhalinyarada, macnahiisuna waa ciyaar, amaba wakhti farxad leh.

Eraygu waa Carabi asal ahaan, balse Soomaaliduna wey isticmaashaa.

Tusaale: Dhalinyaradani baashaal iyo ciyaar bey ku jiraan.

أَمْ تُرِيدُونَ أَن تَسْـَٔلُوا۟ رَسُولَكُمْ كَمَا سُئِلَ مُوسَىٰ مِن قَبْلُ ۗ وَمَن يَتَبَدَّلِ ٱلْكُفْرَ
بِٱلْإِيمَٰنِ فَقَدْ ضَلَّ سَوَآءَ ٱلسَّبِيلِ ١٠٨

Badal, Suurada Al Baqara (2:108)

Fasiraadda Aayada

Mise waxaad dooneeysaan inaad wax waydiisaan Rasuulkiinna sidii loo waydiiyey (*Nabi*) Muuse hada kahor, ruuxii ku badala gaalnimo limaanka wuxuu ka dhumay Jidka toosan.

Tusaalaha erayga Badal, iyo isticmaalkiisa

Erayga badalid waa ku doorasho waxaad haysatid waxkale. Magac ahaana Soomaalidu wey u isticmaalaan. Badal, amaba badalid waa eray maalin walba la isticmaalo, Quraankana aad buu ugu jiraa macno weyna wuu xambaarsan yahay.

Fiiro gaar ah

Weedha "badal" aad ha looga baaraan dago oo haloo baadho sadexdan Aayadood ee ay ku jirto.

وَإِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ ءَايَاتُنَا بَيِّنَٰتٍ ۙ قَالَ ٱلَّذِينَ لَا يَرْجُونَ لِقَآءَنَا ٱئْتِ بِقُرْءَانٍ غَيْرِ
هَٰذَآ أَوْ بَدِّلْهُ ۚ قُلْ مَا يَكُونُ لِىٓ أَنْ أُبَدِّلَهُۥ مِن تِلْقَآئِ نَفْسِىٓ ۖ إِنْ أَتَّبِعُ إِلَّا مَا يُوحَىٰٓ إِلَىَّ ۖ
إِنِّىٓ أَخَافُ إِنْ عَصَيْتُ رَبِّى عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ ١٥

Badal, Suutada Yuunis (10:15)

Fasiraadda Aayada